

UCODAYNTA \$27 MILYAN


U adeegso waraaqaha mashruucaan si aad u taxdo afarta (4) mashruuc ee aad ugu jeceshahay qaab isku xiga salka hoose ee bogaan. Mahruuca #1 ayaa noqonaaya mashruuca kuugu muhiimsan.

A	B	M	N				
<p>Kooxda Gurmada Masiibada Madaniga ah Maaha Booliiska Maal gelinta xirfadleyaasha tababaran ee caafimaadka dhimirka ayay tahay inay noqdaan shaqaalaha gurmada degdega ah ee masiibooyinka caafimaadka dhimirka.</p>	<p>Cadaalada Jiilka Soo Socda Kooxaha daawaynta iyo dhaqan gelinta ee dhalinta da'aha 13-24. Siinta goobaha waxbarashada iyo dhiiri gelinta dib u naqshadeynta nidaamyada iyo bixinta khayraadka iyo adeegyada yareynta waxyeelada.</p>	<p>Fayaqabka Ku Haboon Dhaqanka Maal gelinta kooxaha aasaaska u ah mashaariicda faya qabka bulshada ee kaladuwan sida munaasabadaha, hormarinta shaqsiga ah, iyo daawaynta jiilalka kaduwan si kor loogu qaado tayada nolosha.</p>	<p>Kalsoonida Bulshadu Ku qabto Dhisida Hantida Maal gelinta dhulka iyo dhismeyaasha si loo abuuro ganacsiyo ay dakhli ka helaan bulshooyinka loo diiday mulkiyada guryaha waagii hore, helitaanka dhaqaalaha, waxbarashada, iyo shaqada.</p>				
C	D	P	Q				
<p>Dhalinta Dhaladka ah: Waagii Hore, Hadda, Mustaqbalka Xarunta bulshada ee ku taala Duwamish ayaa bixinaysa barnaamijyada dalxiiska, waxbarashada, iyo dhaqanka kuwaasoo xoojinaaya wada shaqaynta bulshada, kor u qaadaaya faya qabka, iyo taageerada ilaalinta dhaqanka.</p>	<p>Caafimaadka Dhimirku waa Muhiim Mashaariicda dhaqan celinta iyo daawaynta gaarka u ah ee bixiyaasha caafimaadka dhimirka iyo caafimaadka habdhaqanka si ay u baxshaan caymiska, helitaanka, iyo taageerooyinka ku haboon dhaqanka ee bulshadu ogolaatay ee caafimaadka dhimirka.</p>	<p>Adeegyada Faya Dhawrka iyo Badqabka Taageerista wada shaqaynada iyo barnaamijyada diirada saaraaya siinta helitaanka badqabka leh ee adeegyada yareynta iyo baaritaanka khatarta, kor u qaadista helitaanka agabka aasaasiga ah, daryeelka caafimaadka, iyo talo bixinta.</p>	<p>Taageerada Guriyaynta Bixinta adeegyada helitaanka guryaha iyo caawimaada oo la siinaayo dadka u baahan.</p>				
E	F	R	S				
<p>Dareenadeyda Barnaamijka iyo taageerada caafimaadka dhimirka ee dhalinta iyo day'yarta qaangaarka ah.</p>	<p>Sinaanta Beeraha iyo Cuntada Casriga ah Ka kiraynta goobaha cagaaran si bulshadu wax ugu beerato, kobcinta ganacsiyada dadka deegaanka, kordhinta helitaanka cuntada darayga ah, iyo tababarida beereleeyda yaryar.</p>	<p>Musqulaha Dadwaynaha oo furan 24/7 Kordhinta tirada musqulaha dadwaynaha iyo xarumaha nadaafada ee shaqeyya 24 saac.</p>	<p>Barnaamijka Tignooloojiyada Mideysan Maal-gelinta barnaamijyada shaqo raadinta ee shaqsiyaadka lagu beegsaday nidaamka isir nacaybka ee ganacsiyada tignooloojiyada.</p>				
G	H	T	U				
<p>Barnaamijka Caweyska ay Dhalinta Hogaamiso Maal gelinta barnaamijka habaynkii oo ay sameeyeen looguna talo galay carruurta 13-18 sano jirada ah.</p>	<p>Goobta Kabaha Taayirada leh iyo Bulshada ee Gudaha loo galo Abuurista marinka kabaha lagu maro ee gudaha oo qiimo jaban. Taas oo sidoo kale noqonaysa goob abuuraysa xiriirada bulshada qaab uu heli karo qof kasta.</p>	<p>Waxaan u Joognaa inaan ku Caawino Abuurista shabakadaha taageerada ee bulshooyinka la faquuqo, bixinta gurmada labo dhinac ah, taagerada dadka isku daruufaha ah isa siiyaan, iyo talo bixinta ilaalinaysa dhaqanka.</p>	<p>Taageerada Guriyaynta ee Dhalinta Ku xirista dhalinta iyo da'yarta qaangaarka ah guryo caawimaad leh ama caawimaada kirada, ayadoo haddana la abuuraya lana maal gelinaayo gudiga dhalinta oo kormeeraaya dedaallada isku xirka iyo xiriirada khayraadka.</p>				
J	K	<table border="1"> <tr> <td></td> <td></td> <td></td> <td></td> </tr> </table>					
<p>Fududeeyaasha Khayraadka Taageerada dadka doonaaya adeegyada caafimaadka dhimirka, u fududaynta shaqsiyaadka helitaanka adeegyada caafimaadka dhimirka iyo faya dhawrka, gaar ahaana inta lagu jiro masiibada ama marka ay la dhiban yihiin caafimaadka dhimirka.</p>	<p>Taageerooyinka Dhaqaalaha ee Qoysaska Baahan Xaalada degdega ah ee halka mar ah ee maal gelinta qoysaska waajahaaya caqabada dhaqaale.</p>	<p>AFARTAADA (4) MASHRUUC EE UGU SAREEYA:</p> <table border="1"> <tr> <td>HEERKA #1</td> <td>HEERKA #2</td> <td>HEERKA #3</td> <td>HEERKA #4</td> </tr> </table>	HEERKA #1	HEERKA #2	HEERKA #3	HEERKA #4	
HEERKA #1	HEERKA #2	HEERKA #3	HEERKA #4				

Dhammaan soo jeedinnada waxaa abuuray xubnaha bulshada (Wufuuda Miisaaniyada) oo helaaya taageero, fikir iyo kormeer ay samaynayaan shaqaalaha waaxda Magaalada Seattle.

Xiriirka qandaraaslaha (marka ay qusayso - marka Magaalladu aysan si toos ah u dhaqan gelin karin mashruuca) iyo hawlaha dhaqan gelinta waa in lagu xaqiijiyaa ku dhaqanka dhammaan sharciyada ay qusayso ee Magaallada, gobalka, iyo federaalka iyo xeerakr.

Isbadello kasta oo la sameeyo ingta lagu jiro xulashada qandaraaslaha ama dhaqan gelinta mashruuca la fuliyay si loo joogteeyo ku dhaqanka sharciga ayaa la samayn doonaa si waafaqsan higsiga iyo faahfaahinnada soo jeedinta sida suuragalka ah ee sharcigu fasaxaayo.



MIISAANIYADA DADKA EE SEATTLE

Si aad u codeyso, waa qasab inaad:

- ku nooshahay, ka shaqeyso, ama ku ciyaadho Seattle
- aad jirto ugu yaraan 15 sano

